



Ogeysiiska Kala-guurka Sanadlaha ah

Ujeedada: Kala-guurka ayaa ku dhaca carruurta iyo qoysaska dhammaan inta ay nool yihiin. Hal kala-guur oo muhiim ah oo lagu doonaayo IDEA waa marka carruurtu ay ka guuraan Qaybta C ee Adeegyada Caawimaada Dhalaanka. Qoysaska waa in si buuxda loogu wargeliya hanaanka loona sheegaa xuquuqdooda, waajibaadkooda, iyo dookhyadooda la xiriira kala-guurka. Ogeysiiskaani ayaa la siinaya dhammaan qoysaska marka la qabto kulanka koobaad ee kala-guurka cunugooda kaasoo ay tahay inuu dhaco ugu danbayn 90 maalmood kahor dhalashadiisa sadexaad, iyo, marka ay isku raacaan dhammaan dhinacyadu, ugu badnaan 9 bilood kahor inta aan ilmuu dhamaysan u qalmida helitaanka, ama uusan helayn adeegyada caawimaada dhalaanka. Xogta ku qoran foomkaan waxaa loogu talo galay inay ka caawiso waalidiinta fahamka xuquuqdooda iyo damaanaadka hawsha ee la xiriira adeegyada cunugooda. Barnaamijka caawimaada dhalaanka ayaa sii wadaaya inuu adeegyada caawimaada dhalaanka ee lagu sheegay IFSP ga ilmaha sida ku cad 92 NAC 52-007 kadib da'da 3 sano jir kadib marka ilmuu bilaabo inuu helo adeegyada dugsiga barbaarinta ee ku cad 92 NAC 51 (Adeegyada Qaybta B). Waalidiinta carruurta qaba naafada ayaa sidoo kale xaq u leh inay sii wadaan helitaanka adeegyada caawimaada dhalaanka sida ku cad 92 NAC 52 ilaa bisha Agoosto 31-deeda dhalashiisa sadexaad ama adeegyada dugsiga barbaarinta ee waafaqsan 92 NAC 51.

Farqiyada u dhexeeya Adeegyada Caawimaada Dhalaanka/IFSP iyo Adeegyada Qaybta B/IEP waa sida soo socota:

	Shabakada Hormarinta Dhalaanka - NDE 92 NAC 52/DHHS 480 NAC 3	Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah ee Dugsiga Barbaarinta NDE 92 NAC 51
Da'aha Ilmaha loo Adeegaayo	Carruurta, da'aha dhalashada ilaa Agoosto 31-deeda dhalashadooda 3-aad	Carruurta, da'aha sadex sano ilaa kow iyo labaatan jir
Qorsheyaasha Gaarka ah	Qorshaha Adeegga Gaarka ah Qoyska (IFSP)	Barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP)
Heerka Kobaca Ilmaha	Bayaanka heerarka kobaca ilmaha ee dhammaan qaybaha kobaca, ayna ku jirana aragga, maqalka, iyo caafimaadka.	Bayaanka heerarka guusha waxbarashada hadda ee ilmaha iyo waxqabadka shaqada.
Yoolalka/Natijjada	Yoolalka/Natijjooyinka waxaa: <ol style="list-style-type: none">1. lagu saleeyaa walaacyada iyo muhiimadaha qoyska;2. lagu saleeyay qoyska laguna qoray luuqad ay qoysku fahmayaan oo lagu cadeeyay shuruudaha, hanaanka, iyo jadwalka ho'aaminta hormarka; iyo3. waxay la xiriiri karaan ilmaha, qoyska, iyo bulshada.	Yoolalku waa: <ol style="list-style-type: none">1. kuwo ku saleysan baahiyaha ilmaha sida ay go'aamisay MDT iyo kormeerada waalidiinta iyo shaqaalaha dugsigu sameeyeen;2. waa kuwo ku saleysan taccliinta iyo shaqada;3. Waxaa ku jira higsiyada iyo cabirada; iyo4. waxaa ku jira yoolalka taccliinta iyo shaqada ee la xiriira buuxinta baahiyaha ilmaha ee waxbarashada guud iyo baahiyaha kale ee waxbarashada ee la xiriira naafada ilmaha.

	Shabakada Hormarinta Dhalaanka - NDE 92 NAC 52/DHHS 480 NAC 3	Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah ee Dugsiga Barbaarinta NDE 92 NAC 51
Qaybta Waxbarashada	<p>IFSP-ga carruurta jira sadex sano waa in lagu daraa qaybta waxbarashada oo kor u qaadysa u diyaar garoowga dugsiga laguna daraa aqoonta akhriska iyo qoraalka, luuqada, iyo xirfadaha aqoonta tirada.</p> <p>Iskuduuhahaaga adeegyada oo kaashanaaya inta kale ee kooxda IFSP ayaa kaa caawin doona go'aaminta sida qaybahaan horay xal loogu helay ama waxa u baahan in lagu daro qorshahaaga si loo buuxsho shardigaan.</p>	Haddii ilmuu sii wado inuu u qalmo adeegyada Qaybta B, qoyska oo kaashanaaya kooxda ayaa abuuri doona Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah.
Adeegyada la Heli karo	Adeegyada Caawimaada dhalaanka ee ilmaha iyo qoyska si loo daboolo baahiyaha kobaca ee ilmaha loona kordhiyo awooda qoyska ee buuxinta baahiyaha ilmahooda (tusaaleyaasha ayaa ku qoran xeerkanka).	Waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee loo arkay inay ku haboon yihiin buuxinta baahiyaha waxbarashada ee ilmaha (tusaaleyaasha adeegyada ku qoran xeerkanka) una sahlaaya ilmaha—heerka ugu sareeya ee macquulka ah— inuu ka qaybgalo manhajka waxbarashada guud.
Doorka Qoyska	<p>Ka qaybgalka dhammaan kooxaha gaaraaya go'aannada quseeya qorshaha gaarka ah ee adeegyada ilmaha</p> <p>Helitaanka adegeyada si kor loogu qaado awooda qoyska ee daboolista baahiyaha ilmahooda naafada ah</p>	Ka qaybgalka dhammaan kooxaha gaaraaya go'aannada quseeya qorshaha gaarka ah ee adeegyada ilmaha
Goobta Adeegyada	Goobta dabiiciga ah—ilaa heerka ugu badan ee haboon, ilmaha ayaa loogu adeegyadaa goobo caadi ah ama dabiici u ah da'da ilmaha (ayna ku jirana guriga iyo goobaha daryeelka ilmaha oo isku dhafan)	Goob aan lahayn jajuub—ilaa heerka ugu sareeya ee suuragalka ah, ilmaha ayaa adeegyada ku helaaya ugana qaybgalaaya manhajka guud, hawlaho ka baxsan waxbarashada, iyo nashaadaadka kale asagoo la jooga ilmaha kale ee aan naafada ahayn.
Adeegyada La Bixinaayo Bilaha Xagaaga	Adeegyada lagu go'aanshay IFSP ayaa loosii wadi doonaa sanadka oo dhan ayna ku jiraan bilaha xagaaga.	<p>Ardayda naafada ah, kooxda IEP waa inay tixgelisaa baahida arday kasta ee adeegyada sanad dugsiyeedka la dheereeyay (ESY) inta lagu jiro wakhtiyada marka ardayda kale, kuwa naafada ah iyo kuwa aan naafada ahayn, caadiyan lama bixin doono. Haddii ESY la go'aamiyo inay muhiim u tahay si ardayga loogu sahlo inuu ka faa'iideysto waxbarashadiisa, nooca iyo cadadka adeegyada waxbarashada gaarka ah ee la bixinaayo, ayna ku jiraan inta jeer, goobta, iyo mudada ayaa lagu qorayaa IEP-ga.</p> <p>Dugsiyadu waa inaysan yareyn helitaanka adeegga ESY ee la siinaayo ardayda ku jira qaybaha gaarka ah ee naafada ama xadidin nooca, cadadka, iyo mudada adeegyadaan muhiimka ah la bixinaayo (92 NAC 51 007.07C5).</p>

	Shabakada Kobaca Hore ee Dhalaanka - NDE 92 NAC 52/DHHS 480 NAC 3	Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah ee Dugsiga Barbaarinta NDE 92 NAC 51
Isku-duwaha Adeegyadaada	Saqiir ama socod barad kasta oo naafo ah iyo qoyska ilmuu waa in la siiyaa hal iskuduwaah adeegga ah kaasoo masuul ka ah isku dubaridka dhammaan adeegyada qasabka ah ee ku jira IDEA Qaybta C ee dhammaan waaxaha wakaallada; noqonaayana xiriiriyaaha keliya ee fulinta shaqooyinka lagu sheegay 303.34(a)(3) iyo 303.34(b).	Iskuduweyaasha Adeegyada ayaan lagu bixin adeegyada Qaybta B.
Kala-guurka	Kala-guurka ayaa lagu sheegay talaabooyinka la qaadaayo si loogu diyaar garoobo u badelida si guul leh wakaaladaha cusub ee la filaayo, goobaha adeegyada, bixiyaasha adeegyada, ilaha maal gelinta ama qaababka, iwm.	Adeegyada Kala-guurka (dugsiga ka baxa oo gala nolosha qaangaarnimada) ama qorshaha kala-guurka waa in lagu qoraa IEP-da ugu danbayn da'da 16 sano jir waana in lasii wadaa ilaa sanadka uu ardaygu gaaraayo 21 ama marka la joojiyo waxbarashadiisa gaarka ah, hadba kii soo hormara.
Ilaalinta Habraacyada	Sida lagu sheegay “xeerka 51, 52, 55”, iyo sidoo kale Habraacyada Ilaalinta ee Qaybta C iyo Xuquuqaha Waalidka ee Waxbarashada Gaarka ah, kuwaasoo aad heshay nuqlukooda aadna codsan karto nuqullo kale marka aad doonto, waalidiinta ayaa heli kara diiwaannada waxbarashada (92 NAC 52 009.02C); xuquuqaha cabashada (92 NAC 52 009.06), dhedhexaadinta (92 NAC 52 009.05), hananaka xal gaarista (92 NAC 52 009.07), iyo xalka kiiska (92 NAC 52 009.08).	

**Noocyada Adeegyada iyo Goobaha laga
Dooday:**

Haddii ay jirana wax su'aalo ah oo aad qabto xuquuqdaada, fadlan la xiriir:

Waa la ii sheegay waana helay nuqluka Ogeysiiska Sanadlaha ah ee Kala-Guurka Caawimaada Dhalaanka. Waxaa si buuxda la iigu sheegay aana fahmay xuquuqdayda qusaysa dookhyadeyda kala-guurka ilmaha. Waxaa sidoo kale la i siiyay nuqluka xuquuqdayda waalidnimada iyo ilaallinnada habraaca.

Saxiixa Waalidka:

Taariikhda: